# Ogaysiiska Tallaabada Dheeraadka ah

## Hodhaca Aan la xaqiijin (TNC)

### (Maamulka Amniga Bulshadda (SSA) iyo Waaxda Amniga Wadanka ee Maraykanka.(DHS))

| *For SSA Field Office Staff: use EV-STAR and see POMS RM 10245.005ff* | |
|---|---|
| | |
| Magaca dambe ee Shaqaalaha,Mmagaca Hore | Maamulka Amniga Bulshadda Shaqaalaha |
| | |
| Lambarka-A ee Shaqaalaha | Taariikhda Dhalashada/Sanadka shaqaalaha |
| | |
| Taariikhda Aan la xaqiijin ee Hodhaca ah | Lambarka Xaqjiinta Dacwada |
| Sababta Ogaysiiskan: | |

Loo shaqeeyahaaga, [MAGACA SHAQAALAHA], waxa uu ka qayb galaa E-Verify. E-Verify. waxay barbar dhigtaa macluumaadka aad ku bixisay Foomkakaaga I-9 (Xaqiijinta U qalmida Shaqada) (Maamulka Amniga Bulshadda (SSA) iyo Waaxda Amniga Wadanka (DHS) diiwaanada si loo xaqiijiyo in laguu oggolyahay inaad ka shaqayso Maraykanka.

## Sababta aad ku heshay ogaysiiskan:

Waxaad ka heshay Ogaysiiskan Tallaabada Dheeraadka ah [MAGACA SHAQAALAHA] sababtoo ah waxay u muuqataa in qayb ka mid ah macluumaadka uu geliyay loo shaqeeyahaagu E-Verify aanay waafaqsanayn diiwaanka ay DHS iyo SSA hadda adiga kaa hayaan. Tani lama huraan ahaan lama macno aha inaad siisay macluumaad khalad ah loo shaqeeyahaaga, ama in aan laguu oggolayn inaad ka shaqayso Maraykanka. Waxaa jira dhowr sababood sababta aanu isku waafaqsanayn macluumaadkaagu– waxaad ka akhri kartaa wax badan oo ku saabsan sababahan onlaynka (https://www.uscis.gov/e-verify/employees/tentative-nonconfirmation-overview)

Marka xiga, waxaad u baahan doontaa inaad qaaddo dhowr tallaabo ka hor inta aanay E-Verify ogaysiin loo shaqeeyayaaha in laguu oggolyahay inaad Maraykanka ka shaqayso.

## Waxaad U baahantahay Inaad ogaato:

1. **Dib u eeg macluumaadkaaga xaga sare boggan.** Ogaysii [MAGACA SHAQAALAHA]haddii ay jiraan khaladaad. Loo shaqeeyahaagu waxa uu awood u yeelan doonaa inuu xidho dacwadan oo macluumaadkaaga ku Biiriyo E-Verify mar labbaad oo wadata macluumaadka saxda ah, si wanaagsan u rajaynaya xalinta dacwadan. Haddii macluumaadkaagu sax yahay, u dhaqaaq tallaabada 2.

2. **Go’aan ka gaadh haddii aad doonayso inaad qaado tallaabo si aad u xaliso dacwadan.** Haddii macluumaadkaaga sare uu sax yahay, ka dib waxaad dooran kartaa inaad tallaabo qaado aad ku saxdo diiwaanka markaas DHS iyo diiwaanada SSA waxay muujinyaan in laguu oggolyahay inaad ka shaqayso Maraykanka.

Haddii aad go'aan ku gaadho inaanad qaadin tallaabo aad ku xaliso dacwadan, E-Verify awood uma yeelan doonto ay ku xaqiijiso in laguu oggol yahay inaad ka shaqayso Maraykanka oo loo shaqeeyahaaga waxa uu joojin karaa shaqadaada.

Wixii ah Macluumaadka xuquuqda shaqaalaha iyo masuuliyadaha, booqowww.uscis.gov/e-verify/employees/employee-rights-and-responsibilities.

## Qaadaya tallaabo si loo xaliyo dacwada:

Haddii aad haysato 8 **maalmood oo shaqo Dowlada Federaalka** si tallaabo loo qaado (booqo SSA xafiiska goobta **IYO** la xidhiidh DHS) laga bilaabo taariikhda loo shaqeeyayaagu u soo diro dacwadaada E-Verify. Loo shaqeeyahaagu waa inuu ku siiyaa Xaqiijinta Taariikhda Tixraaca, taas oo kuu sheegi doonta taariikhda aad booqanayso SSA iyo aad la xidhiidhayso DHS.

---

**Booqo Xafiiska Goobta SSA:**

Si aad tallaabo u qaado inaad bilowdo xalinta dacwadan, waa inaad booqataa xafiiska goobta SSA si loo cusboonaysiiyo macluumaadkaaga. Haddii aanad joogin aag halka Xarunta Kaadhka SSA ay taalo waxaa **lagaaga baahanyahay** inaad booqato Xarunta Kaadhka. Si aad u hesho xafiiska SSA, booqo www.socialsecurity.gov/locator , ama wacl SSA lambarka 800-772-1213 (TTY: 800-325-0778).

Keen tan Tallaabada Falka Dheeraadka ah marka aad booqato SSA. U sheeg SSA inaad leedahay arrin E-Verify ah.

SSA ma cusboonaysiin karo diiwaankaaga caddayn la'aan in isbeddel loo baahan yahay. Hoos waxaa ah tusaalooyinka warqaddaha aad u baahan doonto si aad u caddayso da'daada, aqoonsiga, beddelka magaca, iyo heerka muwaadinimada. Keen warqadaha asalka ah, **may** footokoobiyo:

- Caddaynta da'daada, shahaadada dhalashada ama baasaboorka
- Caddaynta aqoonsigaaga: liisanka darawalka ama baasaboor
- Caddaynta magaca sharciga ah: shahaadada guurka, haddii magacaaga hadda aanu ku ool kaadhkaaga SSN
- Caddaynta Muwaadinimada Maraykanka ama heerka shaqada la oggolaaday.
    - Haddii aad tahay muwaadin Maraykan ah -- Shahaadada Dhalasho siinta, shahaadada dhalashada dad wayne ee Maraykanka, ama Baasaboorka Maraykanka, ama
    - Haddii aadan ahayn muwadin Maraykan ah -- Kaadhka Degenaanshaha Joogta ah (Foomka I-551),Warqadda Oggolaanshaha Shaqada (Foomka I-766), ama Diiwaanka Imaanshaha - Bixida (Foomka I-94) ee muujinaya heerka shaqada la oggolaaday.

**Xidhiidhka DHS:**

Si loo qaado tallaabo lagu xaliyo dacwadan, wac DHS lambarka 800-877-8339 (TTY: 800-877-8339) Wakiil ayaa kaa caawin doono inaad ka shaqayso dhexda faahfaahinta dacwadaada.

Furo Ogaysiiska Falka Dheeraadka ah marka aad wacdo DHS, markaas waxaad u gubdinta kartaa iyadda. Wakiilka DHS waxa uu ku waydiin karaa adiga macluumaad dheeraad ah ama warqaddo si loo xaliyo dacwada. Haddii aad caawimo luqad kale ah u baahato, hubso inaad waydiisato turjubaan.

---

Si aad u hubiso heerka dacwadaadam, booqo myE-Verify bogga
https://selfcheck.uscis.gov/SelfCheckUI/CaseTracker

**Fadlan hoos ku sheeg haddii aad niyada ku hayso ama aanad ku hayn inaad ka dooddo dacwadan.**

| **Waxaad doortay inaan: (sax hal)** | | | |
|---|---|---|---|
| ☐ | **Waxaan qaadi doonaa tallaabo si aan u xaliyo dacwada E-Verify. Waxaan fahmay inaan haysto ilaa____ si aan u qaado tallaabadan.** | | |
| | **Ma qaadi doono tallaabo si aan u xaliyo dacwada E-Verify. Waxaan fahmay in haddii aanan qaadin tallaabo E-Verify awood uma yeelan doonto ay ku xaqiijiso in la ii oggolyahay inaan ka shaqeeyo Maraykanka oo loo shaqeeyahaygu waxa uu joojin karaa shaqadayda.,** | | |
| **Saxeexa Shaqaalaha** | | **Taariikhda** | |